Keydka Macluumaadka Kireystayaha

Keydka macluumaadka kireystaha waxaa maamula shirkado gaar ah oo ururiya macluumaad ku saabsan kireystaha oo ka dhiga in macluumaadkan mid ay heli karaan wakiilada guryaha kireeyaa. Wakiilada waxay isticmaalaan keydka macluumaadka si ay u qiimeeyaan 'khatarta ganacsigooda' iyagoo eegaya qofka taariikhdii wax kireysigiisa.

Waxaa jira dhawr keyd macluumaadeed oo qaran oo ka shaqeynaya Australiya. Keydkan macluumaadka waa mid badanaa aan sharciyeysneyn. Natiijo ahaan, kireystayaasha waxay mar marka qaarkood noqonayaan in 'liiska madow lagu daro' arimo yar yar awgood ama ku isticmaalida xuquuqdooda mulkiilaha ama wakiilka. Mar haddii mulkiilaha la diiwaangeliyo waxaa ku adkaanaya inay guri kireystaan.

Keydka Macluumaadka Kireystaha Qaranka (National Tenancy Database (ntd))

Keydka Macluumaadka Kireystaha Qaranka (ntd), oo hore loogu yaqaanay Remington White, waa keydka macluumaadka ee u eg inuu waxyeelaynayo kireystayaasha Fiktooriya. Keydka macluumaadka ntd waxaa heli kara oo keliya wakiilada guryaha (waxaa hadda jira wax ka badan 4,000 oo xubnood), oo aan ahayn mulkiilayaal gaar ah.

Waxaa jira waxoogaa qaybo ah oo loo diiwaangeliyo kireystayaasha sida:

> kireystayaasha la soo jeediyey

> kireystayaasha ka baxay guriga iyagoon wax ogeysiin ah bixin

> kireystayaasha leh ijaar aan la bixin oo ku ururay

> kireystayaasha leh amaro Maxkamadeed oo aysan bixin

> u gudbi wakiilka guryaha

Sababta caamka ah ee lagu diiwaangeliyo waa meesha kireyste uu jebiyey heshiiskii ijaarka oo kharashaadka jebinta heshiisku uu ka weyn yahay debaajiga.

'u gudbi wakiilka' qaybtaan micnaheedu waxaa weeye ma jirto sabab khaas ah oo lagu qoray diiwaangelinta, laakiinse wakiilka sameynaya weydiinta waxaa lagula taliyey inuu kala xiriiro mulkiilihii hore ee kireystaha wixii macluumaad ah. Tan waxaa laga yaabaa inay noqoto mulkiilihii hore inuu helo faahfaahinta xiriirkaaga ee cusub ama in la gudbiyo macluumaad aan la xiriirin sal iyo raadtoona lahayn oo laga yaabo inuu kaa hor istaago helida kireysiga guri cusub.

➲ Haddii aad la xiriirto shirkada keydka macluumaadka si aad uga soo codsato nuqlka taariikhdaada kireysiga, wixii faahfaahin ah oo aad siisaa (tusaale cinwaankaaga cusub, lambarka laysankaaga gaadhiga iwm) waxaa loo gudbin karaa mulkiilahaagii hore iyadoo loo sii marinayo wakiilkiisa guryaha iyadoo ujeedado tahay ka helida deyn aad qabto.

Ogaanshaha inaad diiwaangashan tahay iyo in kale

Haddii aad raadineysid guri aad kireysato oo la diido codsigaaga guri kireysiga, waxay noqon kartaa sababtoo ah waxaad ka diiwaangashan tahay keydka macluumaadka kireystayaasha. Weydii wakiilkaagii hore ee guriga haddii ay ku diiwaangeliyeen iyo in kale keydka macluumaadka haddii ay sidaas tahay, midkee sababtuna maxay tahay. Waxaad sidoo kale jeegareyn kartaa albaabka wakiilka guryaha si aad u aragto haddii ay leeyihiin warqad stiikar ah oo leh inay wax u qoraan keydka macluumaadka kireystayaasha.

Waxaad la xiriiri kartaa shirkadaha keydka macluumaadka oo aad ka codsan kartaa , nuqulka faylka taariikhdaada kireysiga. Waxaa laga yaabaa in lacag lagaa qaado macluumaadkan dartii. Had iyo jeer jeegaree marka hore shirkada khaaska ah haddii ay jiraan kharashaad ku lug leh ka helida macluumaad keydkooda macluumaadka.

ntd (National Tenancy Database) $15 oo interneetka ah ama bilaash ah haddii aad soo dirto codsi qoraal ah sugna 10 maalmood oo shaqo ☎ (03) 8629 1682

Barclay MIS Risk Management ☎ (03) 9848 6158

TICA (Tenant Information Centre of Australia) Xarunta Macluumaadka Kireystaha Australia $14.30 oo la socota codsi qoraal ah ama $5.45 daqiiqadiiba ama wax ka sareeya taleefanka gacanta ama taleefanada lacagta lagu rido ☎ 190 222 0346

Macluumaadkani sax buu ahaa wakhtigii la daabacayey.

Eeg bogga kale...

TENANTS UNION of Victoria Ltd

fact sheet

Shuruucda arimaha gaarka ah

Sharciga Arimaha gaarka ah ee 1988 *(Privacy Act 1988)*, sharcigu wuxuu qabanayaa dadka ka shaqeeya keydka macluumaadka iyo wakiilada guryaha ee bixiya macluumaadka ku saabsan kireystayaasha. Shakhsiyaadku waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan macluumaadka ay hay'adi ka heyso ee iyaga ku saabsan waxayna xaq u leeyihiin inay saxaan macluumaadka haddii uu khaldan yahay.

Keydka macluumaadka kireystaha waxay u hoos imanayaan 'xeerarka arimaha gaarka ah ee qaranka' siyaalahan soo socda:

> kireystayaashu waxay leeyihiin xuquuq ay ku helaan macluumaadka iyaga laga hayo

> wixii macluumaad ah ee la hayo waa inuu dhammeystiran yahay, sax yahay uuna yahay kii ugu danbeeyey

> kireystayaasha waa inay bixiyaan ka raalli ahaanshahooda ka hor intaan macluumaadka loo sii gudbin qof saddexaad iyadoo looga danleeyahay ' ujeedooyinka labaad'

Wakiilada waxaa laga yaabaa inay weydiiyaan kireystayaasha inay saxiixaan foomka ka raalli ahaanshaha si loo siiyo macluumaadkooda shakhsiyeed qof saddexaad (oo ay ku jiraan shirkadaha keydka macluumaadka). Wakiilada waxaa laga yaabaa inay qaadaan aragtida ah inaysan xaqiiq ahaantii u baahneyn ka raalli ahaanshaha kireystaha si loogu sii gudbiyo macluumaadkooda shirkadaha keydka macluumaadka sababtoo ah eegida taariikhda kireysiga ee kireystaha si loo qiimeeyo 'khatarta' ayaa loo arki karaa inay tahay mida ugu muhiimsan oo aysan ahayn ujeedada labaad.

Markaas oo aadan ku khasbaneyn inaad saxiixdo foomka ka raalli ahaanshaha, diidmada waxaa laga yaabaa inay yareyso fursada codsigaaga inuu noqdo mid guuleysta.

Cabashooyinka

Waxaad u caban kartaa Guddoomiyaha Arimaha gaarka ah ee Dawlada Dhexe (Federal Privacy Commissioner) sababahan soo socda awgood:

> haddii aad u maleynayo in macluumaadkaaga shakhsiyeed si khalad ah loo isticmaalayo

> haddii aad ka diiwaangashan tahay keydka macluumaadka kireystaha oo faahfaahintu khaldan tahay

> haddii aad ka diiwaangashan tahay keydka macluumaadka kireystaha oo diiwaangareyntaadu ay halkaas taalay wax ka badan 4 sanno ama dib loo diiwaangareeyey

Si aad cabasho u sameysid, taleefan u dir Guddoomiyaha Arimaha gaarka ah ee Dawlada Dhexe ☎ 1300 363 992.

Ka saarida diiwaanka

Xaalladaha qaarkood, tusaale meeshaad oo kireystuhu uusan khalad ku jirin, Maxkamada Maamulka iyo Madaniga Fiktooriya (Victorian Civil and Administrative Tribunal) waxaa laga yaaba inay amarto ka saarida diiwaanka keydka macluumaadka kireystayaasha. Tani waxay ku xirnaan doontaa xaqiiqda kiiska shakhsi kasta. Wixii macluumaad dheeraad ah la xiriir Ururka Kireystayaasha (Tenants Union).

Wixii macluumaad dheeraad ah taleefan u dir Khadka Tallada Ururka Kireystayaasha (Tenants Union Advice Line) ☎ (03) 9416 2577.

fact sheet

Macluumaadkan waa tuse ahaan oo kaliya waana inaan loo isticmaalin wax kuu bedela tallada sharciga ee aqoonta leh.

Tenants Union of Victoria Ltd ACN 081 348 227 **May 2010** www.tuv.org.au

TENANTS UNION of Victoria Ltd